ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Golaha Sha
cbiga Qaranka.

WUXUU SOO SAARAYAA SHARCIGA SOO SOCDA:

Qod. 1aad

Waxaa la ansixiyay Sharciyada soo socda:

1. Sharciga lambar 3 ee 5 Maarso 1983: Sharciga
Bullaacadaha iyo Dhuumaha Biyaha Qaada.

2. Sharci lambar 4 ee 4 Abriil 1983: U rogid Sha
rci Xeerka Sharci lambar 2 ee 18.3.83 Joojinta Qaadka.

3. Sharci lambar 5 ee 2 Abriil 1983: Sharciga dib
u soo celinta Wakiilnimada Ganacsiga.

4. Sharci lambar 5 bis ee 19 Abriil 1983, U rogid
Sharci Xeerka Sharci lambar 1 ee 1.3.83 wax ka bedde
lidda Tacriifadda Furdada.

5. Sharci lambar 6 ee 9 Maajo 1983: Oggolaansho
Heshiis dhexmaray JDS iyo Bankiga Maalgelinta Yurub
Mashruuca Maalgelinta Warshadda Caanaha Xamar.

6. Sharci lambar 7 ee 21 Maajo 1983: Oggolaa
nsho heshiis dhexmaray JDS iyo Mashruuca Jidka Ba
ydhabo Qeybta 4aad.

7. Sharci lambar 8 ee 18 Maajo 1983: Dhismaha
Warshadda Farsamadda Doonyaha Caagga.

8. Sharci lambar 9 ee 1 Juunyo 1983: U rogid
Sharci Xeerka Sharci lambar 3 ee 14.4.83 wax ku kor
dhinta Sharciga Difaaca Qaranka.

9. Sharci lambar 10 ee 29 Maajo 1983: Dhismaha
Mashruuca Khayraadka Badda.

10. Sharci lambar 11 ee 15 Juunyo 1983: Oggo
laansh heshiis dhexmaray JDS iyo Hay'adda Caisee ee
wax wada qabsiga Mashruuca Dhammeystirka Warsh
adda Shamiintada Berbera.

11. Sharci lambar 12 ee 20 Juunyo 1983: Oggo laansho heshiis dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Carbeed ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada Mashruuca Dhismada Waddada Afgooye—Baydhabo.

12. Sharci lambar 13 ee 20 Luulyo 1983: U rogid Sharci, Xeerka Sharci lambar 5 ee 20 6.83. Kordhinta Canshuurta Shatiga Sigaarka iyo Tarraqa.

13. Sharci lambar 14 ee 20 Luulyo 1983: U rogid Sharci, Xeerka Sharci lambar 6 ee 20.6.83 Canshuurta Dawladda Hoose ee Xamar loo saaray Bansiinka.

14. Sharci lambar 15 ee 20 Luulyo 1983: U rogid Sharci, Xeerka Sharci lambar 4 ee 15 6.83 Horumarinta Abaalgudka Qaadka.

15. Sharci lambar 16 ee 24 Luulyo 1983: Oggo laansho heshiis dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Carbeed ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada Mashruuca Isgaarsiinta Carbeed.

Qod. 2aad

Ansixintan waxay dhaqan gelaysaa laga bilaabo 1da Agoosto 1983, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda..

Muqdisho, 30 Ago. 1983

MADAXWEYNAHA J. D. S.

(Maxamed Siyaad Barre)



IIB MAGALO

FAAFINTÁ RÁSMIGA AH

الرسمية



إلجريدة

Sannadka 12aad Muqdisho 19ka Luulyo 1984 L. 1 R 7
JAMHUURİYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sana-dii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O L I N

QAYBTA

KOOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 22 ee 24 Juunyo 1984. Abuurid da Golaha Sare ee Daryeelka Hooya da iyo Carruurta.

Bogga 476

SHARCI L. 23 ee 24 Juunyo 1984. U rogid Sharci-Xeer Sharci Lam. 4 ee 18.5.84 kuna saabsanaa Dib u habeynta Sharci lam. 4, 13ka 4.1983: Joojinta Qaadka.

» 481

SHARCI L. 24 ee 24 Juunyo 1984. U rogid Sharci-Xeer-Sharci Lam. 6 ee 18 Maajo 1984, kuna saabsanaa Baabi'inta Wa kaaladda Horumarinta iyo Ganacsiga Faleenka iyo Xabkaha.

» 482

SHARCI L. 25 ee 24 Juunyo 1984. U rogid Sharci Xeer-Sharci Lam. 5 ee 18.5.84, Dembiyada Mukhaddaraadka.

» 483

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

SHARCI lambar 25 taariikh 24 Juunyo 1984. U rogid
sharci, Xeer Sharci lambar 5 ee 18ka Maajo 1984:
Dembiyada mukhaadaraadka.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga
Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa loo rogay Sharci Xeerka Sharci lambar 5
ee 18ka Maajo 1984, kuna saabsan dembiyada mukhaa
daraadka.

Qod. 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 15 maalmood ka
dib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee
Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 24 Gii. 1984

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)



IIB MA GALO

FAAFINTA RASMIGA AH

الرسمية



الجريدة

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 12aad Muqdisho 1da Juunyo 1984 L. 6

جمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanaadi waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA

KOOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 20 ee 9 Maajo 1984. Oggolaan
sho Meel marin Heshiis dhex maray BOG- 385
J.D.S. iyo Bankiga horumarinta Afrika

QAYBTA

LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 20 ee
9 Maajo 1984. Meel marin heshiis am
aaheed oo dhex maray J.D.S. iyo Ban » 386
kiga Horumarinta Afrika.

DECREE N. 20 on 9 May 1984. Instrument
of ratification 387

Wakaaladda Madbacadda Qaranka



- XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. II. 21 ee
3 Maajo 1984, magacaabid Sarkaal loo
wakiishay kharajka Miisaaniyadda » 388
Sannadka 1984.—
- XEER SHARCI L. 4 ee 18 Maajo Dib u ha
beynta Sharciga L. 4 ee 13 Abriil 1983, » 389
kuna saabsan Joojinta Qaadka.
- XEER SHARCI L. 5 ee 18 Maajo 1984, Dam
biyada Mukhaadaraadka. » 394
- XEER SHARCI L. 6 ee 18 Maajo 1984, Baa
bi'inta Wakaaladda Horumarinta iyo » 396
Ganacsiga Faleenka iyo Xabkaha.

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA
MID AH.—

- MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,
19.5.84, Lumid Jeeg War. L. 637807 ku » 398
qoran Maxamed Cabdi Cab/maan L. 148
- MAXKAMADDA GOB. BANAADIR 22.5.84
Lumid B. K. L. 21551 ku qoran Saciida » 399
Weheliye Siyaad L. 152
- MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,
14.5.84, Lumid Buug Keyd L. 8671 ku » 400
qoran Aasiya Shariif Maki L. 149
- MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,
30.5.84, Lumid Buug Keyd L. 29181 ku » 401
qoran Macallin Axmed Max/med L. 150
- MAXKAMADDA GOB. TOGDHEER
30.5.84 Lumid Jeeg War: L. 21245 ku » 402
Cali Ibraahim Maxamuud y51
- SOMAL FRUIT — S.P.A. Saldhigga: Muq-
disho — Ra'asumaalka Sh.S0.1.000:000 » 403

XETR-SHARCI Lam. 5 ee 18 Mag. 1984. Dembiyada
Mukhaadaraadka:

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka;

MARKUU TIXGELIYEY: Baahida loo qabo in la ad
keeyo ciqaabta u dhigan dembiyada mukhaada
raadka;

MARKUU GAROWSADAY: Baahida loo qabo in la
dabargooyo waxyaalaha maskaxda dooriya oo ad
duunweynuhu u guntaday la dagaallankooda, waa
jibna ay tahay in JDS ay qaaddo tallaabo kasta oo
lagu xaqiijinayo dabargoyntooda;

MARKUU DHEGAYSTAY: Golah aWasiirrada;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer-Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Xaaladaha Sharcigu bannaynayo marka laga
reebo qof kasta oo sameeya, soo saara ama soo geliya
dalka JDS, ama ka ganacsada, ama siiya (somminis-
tra) ama u keena qof kale waxyaabaha maskaxda doo-
riya (mukhaadaraad), waxa lagu ciqaabayaa 10 sano
oo xarig ah iyo So. Shs. 50.000/= oo ganaax ah.

2. Ciqaabta waa la kordhinayaa haddii waxyaaba
ha kor ku tilmaaman ee maskaxda dooriya laga iibiyo
ama gacanta loo geliyo qof da'diisu ka yar tahay 18 sa-
no, ama xagga maskaxda wax u dhiman yihiin ama
qof ka mid ah dadka mukhaadaraadka isticmaalkiisa
caadaystay.

Qod. 2aad

1. Qof kasta ee oggolaada isagoon ka qayb gelin fa-
lalka ku tilmaaman qodobka hore, in meel caam ah
ama khaas ah ay ku kumaan dad ujeeddadoodu tahay
in waxyaabaha maskaxda dooriya ay ku cunaan ama
ku isticmaalaan, waxaa lagu ciqaabaaa 5 sano oo xarig
ah iyo So. Shs. 25.000/= ganaax ah.

2. Qof kasta oo gala meelaha ku tilmaaman faqrád da hore ee qodobkan, si uu waxyaabaha maskaxda dooriya u isticmaalo, waxaa lagu ciqaabayaa 3 sano oo xarig ah iyo So-Shs. 20.000/= oo ganaax ah.

Qod. 3aad

Qaadista dacwadaha ciqaabta ee mukhaadaraadka waxaa lagu wareejiyey awoodda Maxkamadda Badbaadada Dalka iyo Laamaha Maxkamadda Badbaadada ee Gobollada.

Qod. 4aad

Dacwadaha hor yaalla Maxkamadaha caadiga ah ee aan weli la qaadin iyo kuwa u rahman go'aanka, waxaa lagu soo wareejinayaa Maxkamadda Badbaadada ee deegaan ahaan awoodda u leh.

Qod. 5aad

Xukunsanayaasha dembiyada mukhaadaraadka ee rafcaanlayaasha ah waxay xaq u leeyihiin inay ka tanaasulaan rafcaankooda, haddii aan dacwaddooda xukun ama go'aan loo rahmin, waxayna dhammaysta nayaan ciqaabtii horey loogu xukumay.

Qod. 6aad


Dhanka ciqaabta, eedaysanayaasha u xiran ama loo haysto dembi ka mid ah dembiyada mukhaadaraadka ka dhaqan galka Xeer-sharcigan ka hor, waxaa loo raa cayaa ciqaabaha ku tilmaaman Xeerka ciqaabta iyo shuruucda kale ee horey u jirtay.

Qod. 7aad

Xeer-sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalin ta uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana loo gudbi nayaa Golaha Shacbiga Qaranka si Sharci loogu rago.

Muqdisho, 18 Mag. 1984

MADAXWEYNAHA JDS
(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)



IIB MA GALE

FAAFINTA RASMIGA AH

الرسمية



الجريدة

Sannadka 14aad Muqdisho 1da Agoosto 1986 L. 8

JAMHUUR YADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanaadi waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Kafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA

KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 18 ee 10 Luulyo 1986, Oggolaan-sho Heshiis amaaheed oo dhexmaray J.D.S. iyo Bankiga Afrikaanka ee Horumarinta.

Bog; 571

SHARCI L. 19 10 Luuloy 1986, Canshuur dhimista badeecadaha Dalalka Ururka Beesha Ganacsiga Sokeye ee Afrikaanka.

» 572

SHARCI L. 20 ee 10 Luulyo 1986, Oggolaan-sho ku biirid Axdiga Caalamiga ee Qaruumada Didoobay ee Mukhaddaradka 1971.

» 573

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

- SHARCI L. 21 ee 10 Luulyo 1986, Oggolaansho Heshiis/amaaheed dhexmaray JDS iyo Hay'adda Caalamiga ee «Horumarinta Mashruuca Caafimaadka Xoolaha». » 574
- SHARCI L. 22 ee 10 Luulyo 1986, Oggolaansho Heshiis amaaheed dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Caalamiga ee Horumarinta Beeraha «Mashruuca C/maadka Xoolahā». » 575
- SHARCI L. 23 ee 10 Luulyo 1986, Oggolaansho Heshiis amaaheed dhexmaray JDS iyo Bankiga Horumarinta Islaamka. » 576

QAYBTA LABAAD

XEER

- XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 19/Bis ee 1 Juunyo Qaabka iyo Dhismaha Hanti/ka Guud ee Dawladda. » 577
- XEER MADAXWEYNAHA JDS 20 ee 10 Luulyo 1986, Meelmarin Heshiis amaaheed dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Afrikaanka ee Horumarinta. » 585
- DECREE N. 20 on 10 July 1985, Instrument of ratification. » 586
- XEER MADAXWEYNAHAH JDS, L. 21 ee 10 Luulyo 1986, Meelmarin ku biirid JDS Axdiga Caalamiga ah ee Qaruumada Midoobay ee ku saabsan Mukh/ka. » 587
- DECREE N. 21 on 10 July 1986, Instrument of ratification. » 588

Sharci lambar 20 taariikh 10 Luulyo 1986: Oggolaansho ku biirid Axdiga Caalamiga ee Qaruumaha Midoobay ee Mukhaddaraadka 1971.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

Qod 1aad

1. Waxaa la oggolaaday ku biiridda JDS Axdiga Caalamiga ee Qaruumaha Midoobay, kuna saabsan Mu khaddaraadka.

2. Axdiga kor ku tilmaaman wuxuu soo baxay 1971.

3. Axdiga Mukhaddaraadka ee 1971 wuxuu ka mid noqonayaa Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan Axdiga ku tilmaaman Qodobka 1aad ee Sharcigan waxaa dhaqangelintooda la waafajinayaa Dastuurka JDS iyo Axdiga.

Qod. 3aad

Madaxweynaha JDS waxaa awood loo siiyey inuu meelmariyo Axdiga Sharcigan ku tilmaaman.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqangelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 10 Luulyo 1986

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Xeerka Madaxweynaha J.D.S. Lambar 21 10 Jul. 1986 Meelmarin ku biiridda J.D.S. Axdiga Caalamiga ah ee Qaruumaha Midoobay ee ku saabsan Mukhaadaraadka.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Faqradda 5aad, Qod. 67aad iyo Faqradda 4aad Qod. 82aad ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga Tirsigiisu yahay 49 ee 23ka Disember 1984, kuna saabsan wax ka bedelida Dastuurka.—

MARKUU ARKAY: Sharciga L. 20 ee 10.7.86 oo Golaha Shacbigu ku Oggolaaday ku biiridda Axdiga Xeerkan ku tilmaaman.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in la meelmariyo Axdiga ku biiriddiisa.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la meelmariyay ku biiridda J.D.S. Axdiga Caalamiga ee Qaruumaha Midoobay oo soo baxay Sannadku markuu ahaa 1971 kuna saabsan Mukhaada/dka

Qodobka 2aad

Axdigu wuxuu Dalka J.D.S. ku yeelanayaa awood Sharci ah.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynuhu waxaana lagu soo saarayaa Faaqinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 10 Jul. 1986

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

Decree no 21 of 10 Jul. 1986 Instrument of ratification

THE PRESIDENT

HAVING SEEN: The Article 67, Para 5 and the Article 82, Para 4 of the Constitution of the Somali Democratic Republic.

HAVING SEEN: The Law no of on the base of which

HAVING SEEN: The Law no 49 of 23 December 1984.

HAVING SEEN: The Law no 20 of on 10.7.86 the base of which the People's Assembly has approved the Accession to the Convention on Psychotropic Substances.

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this Convention.

HEREBY PROMULGATES

The Following Decree:

ARTICLE 1

The Accession of the Somali Democratic Republic to the Convention on psychotropic Substances, signed at Vienna on 21 February 1971 is hereby ratified.

ARTICLE 2

This Convention shall have a force of law in the Territory of the Somali Democratic Republic.

ARTICLE 3

This Decree shall come into force upon signature by the President of Somali Democratic Republic and shall be published in Official Bulletin of the State.

Muqdisho, 10 Jul. 1986

THE PRESIDENT OF SDR

Mohamed Siad Barre

IIB MA GALÓ

FAAFINTA

RASMIGA

الرسمية



الجريدة

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMALIYA

الجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 11aad Muqdisho 25 Maarso 1983 L. 1r3

FAAHFAAHIN BIL SOO BAXA

شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S. QIIMADU waa 5 Shiin lambar waliba—RUKUNKA: Sannadii waa Shs. 100 Somaliya gudaheeda—dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaa bmaa 1 Janayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxoo ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanka waxaa a weydiistaa laanta Maanulka Faafinta Rasmiga ah—lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA

KOOWAAD

SHARCI

W. M.

QAYBTA

LABAAD

XEER

XEER SHARCI L. 2 ee 18 Maarso 1983,
Joojinta Qaadka.

Bogga 136

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 8 ee 17
Maarso 1983, Kordhin muddo Cafis.

» 139

QAYBTA

SADDEXAAD

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,
3.3.83, Lumid Jeeg War. L. 298661 ku
qoran Maxamed Ibraahim Wacays
L. 60

» 140

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,
6.9.82, Lumid Jeeg War. L. 295867 ku
qoran Ibraahim Cali Cumar L. 61

» 141

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,
9.3.83, Lumid Buug Kayd L. 5182 ku
qoran Madiina Sh. Cumar L. 62

» 142

Madbacadda Qaranka

- MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG,
12.3.83, Lumid Buug Kayd L. 67 ku qo-
ran Yaasiin Shariif Xasan L. 63 » 143
- MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,
16.3.83, Lumid Jeeg War. L.531676 ku
qoran Maxamed Ibraahim X. Cali L.64 » 144
- MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,
20.3.83, Lumid Jeeg War. L. 332591
ku qoran Macallim Nuur Maxamed
L. 65 » 145
- MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,
16.3.83, Lumid Jeeg War. L. 499833 ku
qoran Axmed Cusmaan Nuur L. 66 » 146
- MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,
16.3.83 Lumid Jeeg War. L. 499832 ku
qoran Axmed Cusmaan Nuur L. 67 » 147
- MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,
16.3.83, Lumid Jeeg War. L. 49985 ku
qoran Axmed Cusmaan Nuur L. 68 » 148
- MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,
16.3.83, Lumid Jeeg War L. 499836 ku
qoran Axmed Cusmaan Nuur L. 69 » 149
- MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,
3.2.83, Lumid J. Wareega L. 025466 ku
qoran Maxamed Cabdi Cabdulle
L. 69/bis » 150
- WARSHADDA KIIMIKADA SOO/YEED
(BAYL) 21.2.83, Ogeysiis Shir Saami-
ley L.70 » 151
- WARSHADDA SAABUUNTA QUBEYSKA
IYO MARISKA, 21.2.83, Ogeysiis Shir
Saamiley L. 71 » 152
- MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,
19.3.83 Lumid Buug Kayd L. 875/83, ku
qoran Maxamed Shariif Xasan L.72 » 153
- MAXKAMADDA G. SH. HOOSE, 21.2.83,
Lumid Buug Kayd L. 712/7 ku qoran
Muslima Macallin Xasan L. 73 » 154

QAYBTA

LABAAD

XEER SHARCI

XEER — SHARCI L. 2 ee 15 Maarso 1983,

Joojinta Qaadka.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qodobka 69 ee Dastuurka J.D.S;

ISAGOO ARKAY (Aqoonsaday): In Qaadka Adduunka looga aqoonsan yahay mukhaadaraadka si tartiib ah mujtamaca wax yeello ballaaran u geysta;

ISAGOO GARAWSADAY: Inay waajib tahay wax ka qabashada wax yaabaha dhibaato u geysta Caafimaadka, Dhaqaalaha, Anshaxa iyo Qoyska Ummadda Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY: In joojinta Qaadka ay leedahay xaalad deg deg ah;

ISAGOO DOEGEYSTAY: Golaha Kasiirada:-

WUXUU XEERIYEY

Qod. 1aad

Laga billaabo dhaqangalka xeer-sharcigan waa la mamnuucay in Qaad dibadda looga soo dejiyo Dalka J.D.S.

Qod. 2aad

Qofkasta ee Qaad dalka J.D.S. dibedda ka soo geliya, soo qaada ama ka qayb qaata falalka noocaas ah waxaa lagu ciqaabayaa:-

— Laba ilaa Shan sannadood oo xabsi ah iyo ganaax
u dhaxeeya So.Shs. 10.000/= ilaa 50.000/=.

— Siiyan ilaa toban sannadood oo xabsi ah iyo ganaax u dhaxeeya Sh.So. 50.000/= ilaa 100.000/=, haddii qofka dembiga noocaas ah horay u galay.

— Qaadka oo la gubo iyo gaadiidka loo isticmaalay qaadidda qaadka oo lala wareego.

Qod. 3aad

Beeraha Dalka gudahiisa ee qaadku ku beeran ya hay dadka lihi waa inay ku baabi'iyaan muddo laba sano ku eg (31.3.85) kuna beddelaan beer cunno.

Haddii qofkaasi sidaasi yeeli waayo beerta waa la gubayaa, asagana waxaa la saarayaa ganaax u dhexeeya Sh. So. 10.000/= ilaa 50.000/=.

Qod. 4aad

Laga billaabo dhaqangalka xeer-sharcigan waa mamnuuc in qaad cusub dalka gudahiisa lagu beero, qofkii beerana waxaa la saarayaa ganaax u dhexeeya Sh.So. 5.000/= ilaa 25.000/=.

Qod. 5aad

Qofka u xilsaaran ilaalinta iyo dhaqangalka sharcigan ee suuragal ka dhiga ama fududeeya in qaad dalka la soo geliyo, laga beero ama uu ku beernaado, wuxuu mutaysanayaa ciqaabaha qodobada sare ku xusan oo laba laab ah.

Qod. 6aad

Ciddii soo qabata ama kaalin ka qaadata dabar goynta dambiyada sharcigani sheegaya waxaa la sii nayaa abaalgud dhan 30% ganaaxa lagu xukumay dambiilaha (Sh.So. 5.000/= ilaa 20.000/=).

Qod. 7aad

Qaadista dacwadaha la xiriira dambiyada sharci-gaani dhigayo waxaa awood u leh Maxkamadda Bad-baadada Dalka.

Qod. 8aad

Xeer-sharcigaani wuxuu dhaqangelayaa markii uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. waana in loo gudbiyaa Golaha Shacbiga si uu u raasmiyeeyo.

Muqdisho, 18 Maarso 1983

MADAXWEYNAHA JDS

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

FAAFINTA

RASMIGA

الرسمية



الجريدة

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMALIYA

الجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 11aad Muqdisho 29 Abr. 1983 1 4

FAAHFAAHIN BIL SOO BAXA

شهرية

Maanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S. QIIMADU waa 5 Shilin lambar waliba—RUKUNKA: Sannadii waa Shs. 100 Somaliya gudaheeda—dibaddeedana waa Shs. 300. Ruknka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxoo ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanka waxaa a weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah—lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA

KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 4 ee 13 Abr. 1983, U rogid Sharci, Xeer Sharci Lamb. 2 ee 18 Maarso 1983.

BOG. 210

SHARCI L. 5 ee 2 Abr. 1983, Sharci ku saabsan dib u soo celinta Wakiilada Gannacsiga Dibadda.

» 213

QAYBTA

LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA J. D. S. L. 9 ee 6 Abr. 1983, Meel marin Heshiis dhe xmaray Dawladda Qadar iyo Dawladda J. D. S. Kuna saabsan Shaqaalaha Soomaaliyeed ee ka shaqayndoona Dalka Qadar.

» 213

Wakaaladda M. Qaranka

QAYBTA LABAAD
X E E R

SHARCI Lambar 4 taariikh 13 Abr. 1983 U rogid Sharci
Xeer Sharci Lambar 2 ee 18.3.83, Joojinta Qaadka.

MADAXWEYNAHA J. D. S.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga
Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa loo rogay Sharci, Xeerka Sharci tirsigiisu
yahay 2 ee soo baxay 18kii Maarso 1983, kuna saabsan
Joojinta Qaadka, isagoo dib loo habeeyay, loona bedde
lay sida ku tilmaaman qodobbada soo socda.

Qod. 2aad

Laga billaabo dhaqangalka Xeerka Sharci ee qodob
ka sare ku tilmaaman, waxaa la mamnuucay in Qaad
dibedda looga soo dejiyo Dalka J. D. Soomaaliya.

Qod. 3aad

Qof kasta ee Qaad Dalka J. D. S. Dibedda ka soo ge
liya, soo qaada ama ka qayb qaata falalka noocaas ah,
waxaa lagu ciqaabayaa.

Laba ilaa Shan Sanadood oo xabis ah iyo ganaax u
dhexeeya Sh. So. 10.000 ilaa Sh. So. 50.000.

Shan ilaa toban Sanadood oo xabsi ah iyo ganaax
u dhexeeya Sh. So. 50.000 ilaa Sh. So. 100.000, Haddii qof
ku dembiga noocaas ah horey u galay.

Qaadka oo la gubo iyo Gaadiidka loo isticmaalay
qaadiddiisa oo lala wareego, haddii ay caddaato in ula
kac loogu soo qaaday.

Qod. 4aad

Beeraha Dalka gudhiisa ee Qaadku ku beeran ya
hay, dadka lihi waa in ay ku baabi'yaan muddo hal Sano
ku eg (31.3.84), kuna beddelaan beero cunno.

Haddii qofkaasi sidaasi yeeli waayo, Qaadka waa la
baabi'inayaa, asagana waxaa la saarayaa ganaax u dhe
xeeya Sh. So. 19.000 ilaa Sh. So. 50.000.

Qod. 5aad

Laga bilaabo dhaqangalka Sharcigan, waa maamulka in Qaad cusub Dalka gudahiisa lagu beero, qofkii beerana waxaa la saarayaa ganaax u dhexeeya Sh. So. 5.000 ilaa Sh. So. 25.000, iyo Qaadkii uu beeray oo la baa bi'iyo.

Qod. 6aad

1. Waxaa reeban in qaad dibedda looga soo saaro beerta uu ka baxo ee Dalka gudahiisa ah.

2. Qofkii ku xadgudba tilmaanta xubinta hore ee qodobkan, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi u dhexeeya 3 ilaa 6 bilood iyo ganaax u dhexeeya Sh. So. 1.000 ilaa Sh. So. 3.000.

3. Haddii ujeeddada looga soo saaray ay tahay mid ganacsi, ciqaabtu waxay noqoneysaa 6 ilaa 12 bilood oo xabsi ah iyo ganaax u dhexeeya Sh. So. 5.000 ilaa Sh. So. 25.000.

4. Qofka beerta lihi ama ka masuulka ah haddii uu gacan ka geysto falalka kor ku tilmaaman, ama uu oggolaado in beerta dibedda loogala baxo Qaad, ciqaabta waa loo laba laabayaa.

Qod. 7aad

Marka laga reebo xaaladaha ku tilmaaman qodo 2 iyo 6 ee Sharcigan, qof kasta oo lagu helo qaad Dalka gudahiisa ama dibeddiisa ka baxay, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi u dhexeeya 6 ilaa 12 bilood, iyo ganaax u dhexeeya Sh. So. 5.000 ilaa Sh. So. 25.000.

Qod. 8aad

Qofka u xilsaaran ilaalinta iyo dhaqangelinta Sharcigan ee suura gal ka dhiga, ama fududeeyo, ama ku kaca fal ah in qaad Dalka la soo geliyo, lagu beero, ku sii beernaado waqtigii loo qabtay kadib, laga soo saaro halkii uu ku beernaa ama gudan waaya xilka ka saaran cabashada dadka haysta, wuxuu muteysanayaa ciqaabta u dhigan dembiga xilkii ka saarnaa uu gabay oo la ba' laab ah.

Qod. 9aad

Lacagta ka soo xeroota' ganaaxyada ku tilmaaman Sharcigan, boqolkiiba Sodon (30%) waxaa loo bixina yaa abaalgud, waxaana loo qaybinayaa sida ku tilmaan Qod. 9—B ee Sharciga tirsigiisu yahay 30, soona baxay 13kii Noofember 1980.

Qod. 10aad

Qaadista dacwadaha la xiriira dembiyada Sharcigani dhigayo waxaa awood u leh Maxkamadda Badbaa dada Dalka.

Qod. 11aad

Wasaaradda Beeruhu waxay kaalmo u fidineysaa beeraleyda ku baabi'yo qaadka u beeran inta ayan dha maan muddada halka Sano ah ee ku tilmaaman Qod. 4aad ee Sharcigan.

Qod. 12aad

Waxaa la buriyay Sharci ama Xeer kasta oo ka soo hor jeeda ama aan la socon karin Sharcigan.

Qod. 13aad

Sharcigani dhaqangalkiisu wuxuu ka billaabana yaa 15ka Abriil 1983, waxaana lagu soo saarayaa Faa finta Rasmiga ah ee Jamhuriyadda.

Muqdisho, 13.4.1983.

MADAXWEYNAHA J. D. S.

(Maxamed Siyaad Barre)

XEER SHARCI LAM. 7 EE 23 LUULIYO 1983.

Wax ka beddalidda sharciga joojinta Qaadka.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY : Qodobka 69 ee Dastuurka J.D.S.;

ISAGOO ARKAY : Sharci lam. 4 ee 13/4/1983;

ISAGOO GAROWSADAY: Baahida loo qabo in ay miisaniyadda
culays uga iman dabargoynta qaadka;

IYADOO UU SOO JEEDIYAY: Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda;

ISAGOO DHAGEYSTAY: Golaha Wasiiradda;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciiga soo socda:

QOD. 1aad

Ciqaabta xarigga ah ee ku qeexan sharci lam. 4 ee 13/4/1983, dembiilaha waxaa awood loo siiyay inuu gadan karo muddada xarigga, haddii dambiga noocaas ah uu yahay kii ugu horreyay.

Qofkii hore u xukunaa waa ka faa'iideysan karaa awoodda ku cad faqradda sare.

QOD. 2aad

Waxaa la buuriyay xeer sharci lam. 4 ee 15/6/1983, kuna saabsanaa horumarin abaalgudka ku xusan qod. 9aad ee sharci lam. 4 ee 13/4/1983.

QOD. 3aad

Xeer sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaaniniinonogudbiyaa Golaha Shacbiga si uu sharci ugu rogo.

Muqdisho, 23 Luuliyo 1983.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

FAAFINTA

RASMIGA

الرسمية



الجريدة

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 11aad Muqdisho 1 Oktoobar 1983 L. 10

FAAHFAAHIN BIL 800 BAKA

جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J. D. S. QIIMADU Waa 5 Shan lambar walba—RUKUNKA: Sannadii waa Sh. So. 100 Somaliya gudaheeda—dibaddeedana waa Sh. So. 300 Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wu xuu ka bilaabmaa 1 Janayo Qiiimaha qoristaanku F.R. halkii sadar iyo wixii ka yar waa 2 laba lh. Rukunka & qorista nka waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmi ga ah—lacagta waxaa lagu bixinayaa Kafiika Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD
S H A R C I

- SHARCI L. 17 ee 30 Agoosto 1983, Wax ka beddelidda Canshuurta Maaweelada ee Filimada iyo Riwaayadaha Bogga 578
- SHARCI L. 18 ee 30 Agoosto 1983, U rogid Xeerka Sharciga Lam. 7 ee 23.7,83, wax ka beddelidda Sharciga Joojint Qaadka » 579
- SHARCI L. 19 ee 30 Agoosto 1983, Ansixinta Sharciyada la soo saaray 1,1,83 ilaa 30,7,1983. » 581

Wakaaladda M. Garanka

SHARCI Lambar 17 taariikh 30 Agoosto 1983 U rogid Sharci Xeerka Sharci Lambar 7 ee 23.7.83 wax ka beddelidda Sharciga Joojinta Qaadka.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO.SAARAYAA SHARCIGA SOO SOCDA:

Qod. 1aad

Waxaa loo ragay Sharci, Xeerka Sharci Lambar 7 ee 23.7.83, wax ka beddelidda Sharciga Joojinta Qadka

Qod. 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 15 maalmood kaddib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 30 Agoosto 1983

MADAXWEYNAHA J. D. S.

(Maxamed Siyaad Barre)



IIB MA GALO

FAAFINTA RASMIGA AH

الرسمية



الجريدة

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 12aad Muqdisho 1da Juunyo 1984 L. 6

جمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanaadi waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA

KOOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 20 ee 9 Maajo 1984. Oggolaan
sho Meel marin Heshiis dhex maray BOG- 385
J.D.S. iyo Bankiga horumarinta Afrika

QAYBTA

LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 20 ee
9 Maajo 1984. Meel marin heshiis am
aaheed oo dhex maray J.D.S. iyo Ban » 386
kiga Horumarinta Afrika.

DECREE N. 20 on 9 May 1984. Instrument
of ratification 387

Wakaaladda Madbacadda Qaranka



- XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. II. 21 ee
3 Maajo 1984, magacaabid Sarkaal loo
wakiishay kharajka Miisaaniyadda » 388
Sannadka 1984.—
- XEER SHARCI L. 4 ee 18 Maajo Dib u ha
beynta Sharciga L. 4 ee 13 Abriil 1983, » 389
kuna saabsan Joojinta Qaadka.
- XEER SHARCI L. 5 ee 18 Maajo 1984, Dam
biyada Mukhaadaraadka. » 394
- XEER SHARCI L. 6 ee 18 Maajo 1984, Baa
bi'inta Wakaaladda Horumarinta iyo » 396
Ganacsiga Faleenka iyo Xabkaha.

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA
MID AH.—

- MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,
19.5.84, Lumid Jeeg War. L. 637807 ku » 398
qoran Maxamed Cabdi Cab/maan L. 148
- MAXKAMADDA GOB. BANAADIR 22.5.84
Lumid B. K. L. 21551 ku qoran Saciida » 399
Weheliye Siyaad L. 152
- MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,
14.5.84, Lumid Buug Keyd L. 8671 ku » 400
qoran Aasiya Shariif Maki L. 149
- MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,
30.5.84, Lumid Buug Keyd L. 29181 ku » 401
qoran Macallin Axmed Max/med L. 150
- MAXKAMADDA GOB. TOGDHEER
30.5.84 Lumid Jeeg War: L. 21245 ku » 402
Cali Ibraahim Maxamuud y51
- SOMAL FRUIT — S.P.A. Saldhigga: Muq-
disho — Ra'asumaalka Sh.S0.1.000:000 » 403

XEER-SHARCI lambar 4, taariikh 18 Mag. 1984:
Dib u habeynta Sharci lambar 4 ee 13ka Abriil 1983,
kuna saabsan joojinta qaadka.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 4 ee 14ka Abriil
le kuna saabsan joojinta qaadka iyo beddelaadya
dii ka dambeeyey;

MARKUU TIXGELIYEY: Duruufaha iyo waayaha
lala kulmay muddadii ka soo wareegtay dhaqan
galka Sharciga joojinta qaadka;

MARKUU OGAADAY: In soo gelinta qaadka Dalka
JDS iyo ganacsigiisa loo adeegsado tabo cusub oo
abaabul qalab, hanti iyo dadba leh, ujeeddadoodu
na tahay in la wiiqiyo himilada Ummadda iyo Daw
ladda Soomaaliyeed ee ka badbaadinta Bulshada
dhibaatooyinka dhaqan, dhaqaale, akhlaaq iyo
guud ahaan bulshadeed ee qaadku leeyahay;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan
tahay in dib loogu laabto Sharciga joojinta qaad
ka, loona habeeyo qaab looga gudbi karo xakabya
da ka soo baxay Sharcigii hore, isla markaasna
looga hortegi karo xeeladaha iyo tabaha cusub ee
la adeegsado;

MARKUU TIXGELIYEY: Dabeecadda degdegga ah
ee dib u habeyntani leedahay, sidaas darteedna ay
lagama maarmaan noqotay in lagu soo saaro Xeer-
Sharci;

MARKUU DHEGEYSTAY: Golaha Wasiirrada;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer-Sharci ee soo socda:

Qod. laad

Waxaa dib u habeyn lagu sameeyey Sharci lambar
4, soona baxay 13kii Abriil 1983, kuna saabsan joojin

ta qaadka, waxaana loo beddelay sida ku tilmaaman qodobbada soo socda:-

Qod. 2aad

Waxaa la xaaraantimeeyey in Dalka JDS qaad la ga soo geliyo, Dalka gudihisa lagu beero, lagu haysto ama lagu cuno.

Qod. 3aad

Qof kasta oo qaad Dalka dibedda ka soo geliya, ama gacan ka geysta soo gelintiisa, ama ka ganacsada ama dullaal ka noqda ganacsigiisa, waxaa lagu ciqaa bayaa:

- 3 ilaa 15 sano oo xarig ah iyo ganaax u dhexee ya 50.000 ilaa 100.000 shilin Soomaali;
- 10 ilaa 20 sano oo xarig ah iyo ganaax u dhexee ya 100.000 ilaa 200.000 shilin Soomaali, haddii qofku dembiga noocaas ahi horey u galay.

Qod. 4aad

1. Gaadiidka loo isticmaalay soo gelinta qaadka Dalka JDS, ama lagu helo Dalka gudihisa isagoo sida qaad, waa lala wareegayaa, qaadkaana waa la gubayaa.

2. La wareegidda gaadiidka waxaa shardi u ah in Milkiilaha ama qofka uga wakiilka ah gaadiidka uu ula kac ugu soo qaaday qaadka

Qod. 5aad

1. Qof kasta oo guriga uu deggan yahay ama masuulka ka yahay laga helo qaad ama lagu cuno waxaa lagu ciqaabayaa ganaax u dhexeeya 10.000 ilaa 50.000 shilin Soomaali, haddii ay caddaato inuu ogaa qaad kaas, raallina ka noqday.

2. Qofka guriga deggan waxaa loola jeedaa qofka masuulka ka ah guriga markii dembigu dhacayey, og golaadayna in qaad lagu haysto ama lagu cuno, wuxuu na noqon karaa milkiilaha guriga, kireystaha, ama qof kasta oo si kasta masuul uga ah guriga.

3. Guriga waxaa loola jeedaa hoyga hurdada, mee laha ganacsiga ama meel kasta oo qof ama dad u gaar ah.

Qod. 6aad

1. Waxaa reebban in qaad Dalka gudahiisa lagu beero.

2. Qof kasta oo qaad ku beera Dalka gudahiisa ama kuwii horey ugu beernaa baabi'in waaya, waxaa lagu ciqaabayaa 3 ilaa 15 sano oo xarig ah iyo ganaax u dhexeeya 50.000 ilaa 100.000 shilin Soomaali, iyo qaad ka oo la gubo.

Qod. 7aad

Marka laga reebo xaaladaha ku tilmaaman Qod. 3aad ee Sharcigan, qof kasta oo lagu helo isagoo hays ta ama cunaya qaad, waxaa lagu ciqaabayaa:

- Hal ilaa 5 sano oo xarig ah iyo ganaax u dhexeeya 10.000 ilaa 50.000 shilin Soomaali;
- 3 ilaa 10 sano oo xarig ah iyo ganaax u dhexeeya 30.000 ilaa 100.000, haddii dembiyluhu yahay qof horey loogu xukumay dembi noocaas ah.

Qod. 8aad

Qofka xabsi lagu xukumay dembi qaad dartiis, haddii xukunku yahay kii ugu horreeyey, wuxuu ciqaabta xarigga ah ku beddelan karaa mid lacageed, iyadoo dembiintiiba loo xisaabinayo 100 (boqol) shilin Soomaali.

Qod. 9aad

Qofka u xilsaaran ilaalinta iyo dhaqangelinta Sharcigan ee suuragal ka dhiga am afududeeya ama ku kaca fal ah in qaad la soo geliyo Dalka, laga ganacsado, lagu beero, lagu haysto, lagu cuno ama si kastaba u gaba xilka ka saaran qabashada fal dembiyeedya daas, wuxuu muteysanayaa ciqaabta uu dhigayo qo dobka ku saabsan fal dembiyeedka uu qaban waayey.

Qod. 10aad

Xukunka ku dhaca, dembi qaad dartiis, Shaqaala ha Qaranka ee Reyidka ah iyo kuwa Ciidammada Qalabka Sida, wuxuu xukunsanaha u keenayaa:

- Xiriirka shaqo oo xaq la'aan go'a;
- Xuquuqda hawlgabka iyo liiltirka oo ka lunta.

Qod. 11 aad

1. Lacagaha ka soo xerooda ganaaxyada iyo xabsi beddeleshada, boqolkiiba soddon (30%) waxaa loo bixinayaa abaalgud, waxaana loo qaybinayaa sida soo socota:

- Soo sheegayaasha 10%;
- Soo qabtayaasha 7%;
- Baarayaasha 3%;
- Shaqaalaha Maxkamadda dacwadda qaaday 5%;
- Sanduuqa Horumarinta Degmada 5%;

2. Soo sheegayaasha dembiga waa in qaybtiisa loo hormariyaa, lana siiyaa marka dembiilaha xukunku ku dhaco. Hormariska waxaa bixineysa Wasaaradda Maaliyadda.

3. Kooxaha kale, qaybaha ku soo aada waxay ka qaadanayaan lacagta soo xeroot.

4. Haddii soo-sheege uusan jirin, soo qabtaha ama soo qabtayaasha waxay yeelanayaan boqolkiiba (10%).

Qod. 12aad

1. La dagaallanka iyo dabar goynta qaadka waa waajib saaran Dawladda iyo Dadweynaha Soomaaliyeed.

2. Qaranku magdhow ka bixin maayo dhibaataada iyo khasaaraha la soo gudboonaada qofka isku daya ama is hortaaga Ciidan gudanaya waajibbaadkiisa sharci ciga ah ee ka hortagga iyo gacan ku dhigidda dambi yada qaadka.

Qod. 13aad

Qaadista dacwadaha la xiriira dembiyada Sharci gan ku tilmaaman waxaa awood u leh Maxkamadda

Badbaadada Dalka iyo Laamaha Maxkamadda Badbaadada ee Gobolka.

Qod. 14aad

Waxaa la burriyey sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan.

Qod. 15aad

Xeerkan sharci wuxuu dhaqan gelayaa isla maalin ta uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah JDS, isla markaana waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacbiga, si loogu rogo Sharci.

Muqdisho. 18 Mag. 1984

MADAXWEYNAHA JDS.
(Maxamed Siyaad Barre)



IIB MAGALO

FAAFINTÁ RÁSMIGA AH

الرسمية



إلجريدة

Sannadka 12aad Muqdisho 19ka Luulyo 1984 L. 1 R 7
JAMHUURİYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sana-dii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O L I N

QAYBTA

KOOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 22 ee 24 Juunyo 1984. Abuurid da Golaha Sare ee Daryeelka Hooya da iyo Carruurta.

Bogga 476

SHARCI L. 23 ee 24 Juunyo 1984. U rogid Sharci-Xeer Sharci Lam. 4 ee 18.5.84 kuna saabsanaa Dib u habeynta Sharci lam. 4, 13ka 4.1983: Joojinta Qaadka.

» 481

SHARCI L. 24 ee 24 Juunyo 1984. U rogid Sharci-Xeer-Sharci Lam. 6 ee 18 Maajo 1984, kuna saabsanaa Baabi'inta Wa kaaladda Horumarinta iyo Ganacsiga Faleenka iyo Xabkaha.

» 482

SHARCI L. 25 ee 24 Juunyo 1984. U rogid Sharci Xeer-Sharci Lam. 5 ee 18.5.84, Dembiyada Mukhaddaraadka.

» 483

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

SHARCI lambar 23 taariikh 24 Juunyo 1984, U rogid sharci. Xeer-sharci lambar 4 ee 18ka Maaajo 1984, kuna saabsanaa dib u habeynta Sharci lambar 4, taariikh 13ka Abriile 1983: Joojinta Qaadka.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa loo rogay Sharci, Xeer-sharci lambar 4 ee 18ka Maaajo 1984: dib u habeynta Sharciga lambar 4 ee 13ka Abriile 1983 kuna saabsan joojinta Qaadka.

Qod. 2aad

Sharligan wuxuu dhaqan gelayaa 15 maalmood kadib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 24 Gii. 1984

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad-Barre)